***WAR-SAXAAFADEED***

## ***Midowga Yurub oo ganacsiyada gaarka ee Soomaaliya ku taageeraya helitaanka fursado maalgalin***

*Muqdisho, 2da Febraayo 2021*

Midowga Yurub ayaa maanta daaha ka rogay sedex mashruuc oo lagu taageerayo ganacsiyada gaarka ee Soomaaliya. Mashariicda ayaa si weyn sare ugu qaadaya dar dar galinta hawlaha uu Midowga Yurub ka hayo dalka, iyadoo ay mashaariicdani u fududaynayaan hay'adaha maalgalineed daboolista baahiyaha maalgalin ee ay qabaan ganacsiyada yar yar iyo kuwa dhax-dhaxaadka ah, sidaana ku sahli doonto abuurista jawi dhiirri galinaya maalgashiga.

"*Ifafaalle wanaagsan ayaa Midowga Yurub uga muuqda ganacsiyada gaarka ee Soomaaliya, kuwaasoo ku suntan firfircooni iyo hal abuur*" ayuu yiri Danjiraha Midowga Yurub ee Soomaaliya Nicolas Berlanga Martinez. "*Ganacsiga Soomaaliya ayaa hana qaaday xilliyo ay aad u koobnayd awoodda adeeg bixineed ee hay'adaha dawladda. Wada shaqayn toos ah oo dhax marta bangiyada Soomaaliya iyo hirgalilnta hannaan sharci oo xoojiya dhaqaalaha dalka ayaa dawr wayn ka ciyaari doona horumar lixaad leh oo ay gaaraan ganacsiyada gaarka ah iyo suuqa shaqada dalka.*"

"*Joogtaynta maalgashiga lagu samaynayo ganacsiyada gaarka ah ee Soomaaliya ayaa lagama maarmaan u ah helitaanka koboc dhaqaale oo loo dhanahay. Waan soo dhawaynaynaa taageerada Modowga Yurub ee ka qayb qaadan doonta Soomaaliya oo yeelata awood iyo mustaqbal ifaya", ayuu yiri Wasiirka Qorshaynta, Jamaal Xassan.*

"*Ganacsiyada gaarka loo leeyahay ayaa dowr weyn ka ciyaara tayaynta iyo kobcinta dhaqaalaha. Xukuumadayada waxay xoog saartay arrintan iyadoo higsanaysa shaqa abuur iyo kobac dhaqaale oo saamayn waarta leh. Mashaariicdan maanta Midowga Yurub uu daahfuray ayaa naga caawinaya go'aankeenna sare u qaadidda tayada nolosha shacabkeenna iyo bulshadeenna",* ayuu ku daray Wasiir ku Xigeenka Maaliyadda, Cabdullahi Sheekh.

"*Dawladda Soomaaliya ayaa si joogta ah xoogga u saartay saamaynta ay ku leeyihiin ganacsiyada gaarka loo leeyahay wax ka bedelka nolosha bulshada. Taageerada Midowga Yurub ee joogtada ah ayaa garab naga siinaysa dardar galinta kobaca ganacsiyada gaarka loo leeyahay inagoo ka wada gol gaarayna danaha aan isaga midka nahay ee xoojinta dhaqaalaha bulshada Soomaaliyeed kaas oo laf dhabar u ah helitaanka kobac dhaqaale oo loo dhanyahay. Waxaan uga mahadcelinaynaa Midowga Yurub taageeradiisa iyo wadashaqayntooda ku aaddan xoojinta ganacsiyada gaarka loo leeyahay"*, ayuu hoosta ka xariiqay Wasiir ku Xigeenka Ganacsiga, Cali Maxamed Sheekh.

Sedexdan mashruuc ee qaybta ka ah taabba galinta yoolalka kore ku xusan laguna daahfuraya magaalada Muqdisho ayaa kala ah:

*1.Maalgalinta Kobac loo Dhanyahay*: mashruucan oo uu Midawga Yurub ku maalgalinayo 4.5M€, ayaa higsanayaa sare u qaadidda tayada shaqo ee hay'adaha maalgalineed ee wada shaqaynta la leh Midowga Yurub si loo daboolo baahida maalgalin ee Soomaaliya ka taagan iyadoo loo marayo maalgalinno xaddigooda hooseeyo iyo taakulo dhanka farsamo oo loo fidinayo haweenka iyo dhalinta ganacstada ah ama wax soo saarka ku hawlan, sidaana lagu suurtagaliyo in loo sinaado helitaanka fursadaha maalgalin. Mashruucan ayaa waxaa fulintiisa leh sanduuqa AECF;

*2.Maalgalinta Midowga Yurub ee Sanduuqa Maaliyadeed ee Nordic Fund*: mashruucan oo uu Midowga Yurub ku maalgalinayo of 5.5M€, ayaa qayb ka aha Sanduuqa Fursadaha Geeska Afrika ee loogu yeero (‘Nordic Fund’) kaas oo xoogga saara ganacsiyada Soomaaliyeed ee yar yar iyo kuwa dhax dhaxaadka ah. Maalgashadayaasha Sanduuqan ee dhaqaala ahaan Kaaba waxaa ka mid ah Midowga Yurub, Sanduuqa Norfund, Sanduuqa Maalgashiga Dalalka Kobcaya (IFU), Wasaaradda Arrimaha Dibadda dalka Noorwey, Danida iyo Hay’adda Arsenault Family Foundation. Sanduuqan ayaa waxaa Maamula Shuraako, oo ah barnaamij hoostaga hay’adda ‘One Earth Future Foundation’, iyadoo ay wada shaqayn kala dhaxayso IFU. Shuraako ayaa isku xirta maalgashadayaada iyo ganacsiyada ifafaallaha fiican leh ee Soomaaliya ka shaqeeya si loo dhiirri galiyo xasilloonida iyo horumarka dhaqaale ee guud ahaan gobolka.

*3.Taageerada Wada Xaajoodka khuseeya Siyaasadaha Guud ee Maalgashi*: Mashruucan oo uu Midowga Yurub ku maalgalinayo 1,8M€, ayaa xoogga saaraya jawiga maalgashi iyo midka ganacsi isagoo u maraya sare u qaadidda helitaanka fursadaha maalgashi, galaangalka suuqyada iyo adeegyada asaasiga ah ee ay u baahanyihiin ganacsiyada dhax dhaxaadka ah, ku wax yar yar iyo kuwa bilowga ah, iyadoo si gooni ah looga shaqayn doono taabba galinta dhaqaale ee haweenka. Meelaha muhiimka ah ee uu mashruuca ka shaqaynayo ayaa ah wada hadalka ganacsiga gaarka ah iyo hay’adaha dawladda ee ku shaqada leh; galaangalka suuqyada dawladaha dariska/gobolka; hab-dhaqan wanaagga ganacsi. Mashruucan ayaa waxaa fulintiisa u xilsaaran hay’adda DAI.

**Xog Dheeri ah:**
Mashruucan cusub ayaa qayb ka ah barnaamijka Midowga Yurub ee Horumarinta Dhaqaale ee Loo Dhanyahay kaas oo loo soo gaabiyo (ILED). Midawga Yurub iyo Dawladaha Xubnaha ka ah ayaa taageeraya xasilinta dalka, koboca dhaqaale ee loo dhanyahay iyo dhawrista xuquuqda dadka nugul ee Soomaaliya iyadoo u marinaysa barnaamijka (ILED) (oo ku fadhiya, 98.2 Milyan oo Yuuro). Yoolalka muhimka ah ee ILED ayaa ah helintaanka kobac dhaqaale loo dhanyahay, saamayn waartana leh, kaas oo ku salaysan garowsashada caqabadaha ka taagan Soomaaliya iyo fursadaha yaalla.

**AECF**
Sanduuqa ‘Africa Enterprise Challenge Fund’ ee loo soo gaabiyo (AECF) ayaa ah hay’ad meel sare kaga jirta horumarinta maaliyadeed ee lagu kaabo ganacsiyada si ay u sameeyaan halabuur, shaqa abuur iyo maalgashiyo wax ku ool ah, si loo unko u adkaysi ka dhan ah xasaradaha taagan, bulshooyinka dan yarta ah ee Afrikana u helaan dakhli joogta ah. Sanduuqan oo la bilaabay 2008dii, ayaa maalgashaday 292 ganacsi oo ilaa iyo 40 nooc isugu jira kuna kala yaalla 26 dal oo dhaca koonfurta Saxaraha. Waxaan xoogga saarnaa ganacsiyada beeraha la xiriira, tamarta la cusboonaysiin karo iyo teknoloojiyadda cimilada iyadoo sidoo kale wax laga qabanayo arrimo isku xiriira oo khuseeya, jandarka, dhalinyarada iyo xaaladaha nugul. Tobankii sano la soo dhaafay, waxaan saamayn wey ka gaysanay nolosha wax ka badan 27.7 malyan oo qofood, waxaan abuurnay wax ku 24,000 oo shaqo, annago sidoo kale ku xoojinay $740 malyan sanduuqyo maalgalineed oo nala mid ah.

**IFU**
Sanduuqan waxaa la unkay 1967 wuxuuna u qaabilsanyahay dalka Denmark maalgashiga shisheeyo ee tooska ah isagoo siiyo raasamaal iyo talooyin ay kaga gaashaantaan khataraha ganacsi, shirkadaha danaynaya inay ka hawlgalaan Afrika, Eeshiya, Laatin Ameerika iyo qaybo ka mid ah Yurub. Yoolka sanduuqan ayaa ah inuu qayb ka qaato kobaca dhaqaale iyo midka bulsho ee dalalka la maalgashanayo. Iyadoo fiira gooni ah loo yeelanayo ganacsiyada gaarka loo leeyahay, yoolkan ayaa waxaa lagu gaarayaa shaqa abuur loo siman yahay saamayn waartana leh iyo tayada ganacsi ee macaamiisha oo sare loo qaado, macaamiishan oo u badan ganacsiyada yar yar iyo kuwa dhax dhaxaaka ah. Intaas ka sokow, waxaa jira aqoon kororsi, taageero dhinaca tiknolojiyadda iyo hal abuurka. Ilaalinta halbeegyada caalamiga iyo kuwa dalalka uga degan deegaanka, maamulka, arrimaha bulsho iyo kuwa xuquuqda aadanaha, arrimahaas oo dhamaan qayb ka ah guud ahaan qaybaha maalgashi ee IFU, oo uu ku jiro mashruucan. IFU ayaa leh wax ka badan 812 maalgashi oo laga mira dhaliyay, oo qayb ay ka yihiin wada shaqaynta aan la leenahay ganacsiyada yar yar iyo kuwa dhax dhaxaadka ee ku yaalla 88 dal. IFU ayaa waxaa soo

galiyay Sanduuqan Norfund sannadii 2017 iyadoo markii dambe noqotay mid ka mid ah maalgashadayaasha asaasiga ah kadib markay u yaboohday $2.0 oo malyan horraantii in 2018kii. Sannadii 2020kii, IFU ayaa wareeggii labaad ee maalgashi sanduuqa u yaboohday $5 malyan oo dheeri ah.

**DAI**

DAI ayaa kula fulsiya mashaariicda horumarineed deeq bixiyeyaasha qaab laba geesood ah ama qaab dhinacya badan, waxayna sidoo kale la shaqaysaa dawladaha iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay ee daafaha dunida, iyadoo inta badan ka hawlgasha deegaanno xaalado amni darro iyo colaad ay ka taaganyihiin. Hay'addan oo la aasaasay 1970kii, ayaa sannado badan ahayd mid ay si dhaw ula shaqeeyaan deeq bixiyeyaasha uga waawayn caalamka, waxayna hadda tahay qandaraaslaha ugu wayn ee Guddiga Yurub uga shaqeeya mashaariicda caalamiga ah iyo hawlaha horumarineed. Waaxdeenna ganacsiga Midowga Yurub ayaa hadda fulinaysa wax ka badan 85 mashruuc oo ka socoda 80 dal. Waxaan wax ka qabannaa dhibaatooyinka loo maara waayay ee ka dhasha suuqyada aan nidaamsanayn, taya xumada maamulka dawladeed, iyo xasillooni darrada inagoo isku keenayna khibrado iyo hal abuurnimo ugub ah oo ku aaddan maamulka, horumarka bulshada iyo deegaanka, koboca dhaqaale iyo horumarka tiknolojiyadeed.

**WIXII XOG DHEERI AH KALA XIRIIR:**

Safaaradda Midowga Yurub ee Soomaaliya
Benoit.LARIELLE@eeas.europa.eu